Waa Nuqul Dawli ah – lama iibin karo

JAMHUURIYADDA **SOMALILAND**

FAAFINTA RASMIGA AH

SOMALILAND REPUBLIC OFFICIAL GAZETTE ألنَّشرة الرَّسمية لجمهورية صوماليلاند

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA JSL, HARGEYSA

E-mail: Faafintagaryaqaanka@gmail.com

Sanadka: 6aad	**Cadadka: 1aad ee January**	**Taariikh: 04/02/2017**

QIIMAHA CADADKA: SL. Sh.

RUKUNKA (Subscription):

QIIMAHA FAAFINTA AAN DAWLIGA AHAYN ee Qaybta Shanaad: Sadarkii Boggii kastaaba SL. Sh.

TUSMADA CADADKA

QAYBTA KOWAAD: XEERARKA BAARLAMAANKA, HESHIISYADA CAALAMIGA AH IYO MIISAANIYADDA QARANKA**:**

1) **Wax-ka-bedelka iyo kaabista Xeerka Doorashooyinka Madaxtooyada iyo G/Deegaanka Lifaaqa 6aad ee JSL (Xeer Lr.20/2001)** **3**

2) **Miisaaniyad Sannadeedka 2017-ka** **46**

3) **Dhaqan-galka Xeerka Maamulka iyo Maaliyadda Qaranka Xeer Lr. 75/2016 (wuxuu ku soo baxay Cadad gaar ah)**

4) **Dhaqan-galka Xeerka Hanti-dhawrka Guud ee Qaranka Xeer Lr. 76/2016 (wuxuu ku soo baxay Cadad gaar ah)**

QAYBTA LABAAD: XEER MADAXWEYNE**:**

5) **XEER MADAXWEYNE** Lr: 0756/012017
Magacaabid

6) **WAREEGTO MADAXWEYNE,**
Wareejinta Maamulka iyo Miisaaniyadda Maxkamadaha **50**

Hoose	51
7) **XEER MADAXWEYNE,** Qorshaha Deg-dega ah ee Joojinta Sicir-bararka	
QAYBTA SADEXAAD: XEER NIDAAMIYAYAASHA WASAARADAHA, XEERARKA GOLAYAASHA DEEGAANKA, NATIIJOOYINKA DOORASHOOYINKA & BARNAAMIJYADA DAWLADA:	54
8) **SOOMA BIXIN**	
QAYBTA AFRAAD: GO'AANADA MAAMUL & QARAARADA:	
9) **SOOMA BIXIN**	
***QAYBTA SHANAAD*:** AMARADA, OGEYSIISYADA & QANDARAASYADA DOWLADA:	
10) Diiwaan Gelin Shirikada Durdur Energy Comapany, **Xafiiska Xeer illaalinta Guud**	60
11) Diiwaan Gelin Shirikada Dhaqaalo Kaab Investment, **Xafiiska Xeer illaalinta Guud**	61
12) Diiwaan Gelin Shirikada Amaan PLC **Xafiiska Xeer illaalinta Guud**	63
13) Diiwaan Gelin Alla-Aamin Pharmaceutical & Agro-Vet Import Co **Xafiiska Xeer illaalinta Guud**	65
14) Diiwaan Gelin Shirikada Tacab Wanaag Mining Company **Xafiiska Xeer illaalinta Guud**	66
15) Diiwaan Gelin Shirikada Dahab Oil Industrial **Xafiiska Xeer illaalinta Guud**	68

QAYBTA KOWAAD:

XEERARKA BAARLAMAANKA, HESHIISYADA CAALAMIGA AH IYO MIISAANIYADDA QARANKA:

REPUBLIC OF SOMALILAND

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-4518/012017 DATE....28/01/17

XEER MADAXWEYNE Lr: 0756/012017

Dhaqan-galka Wax-Ka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Doorashada Madaxtooyada iyo Goleyaasha Deegaanka Xeer Lr. 20/2001 (lifaaqa 6aad)

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Go'aanka Golaha Wakiilada, Go'aan Lr. GW/G/KF-32/712/2017 ee ku

taariikhaysan 11/01/2017 ee ay ku ansixiyeen Wax-ka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Doorashooyinka Madaxtooyada iyo Goleyaasha Deegaanka Xeer Lr.20/2001 (Lifaaqa 6aad);



Wuxuu Soo Saaray

Dhaqan-galka Wax-ka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Doorashooyinka Madaxtooyada iyo Goleyaasha Deegaanka Xeer Lr.20/2001 (Lifaaqa 6aad).

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

The Republic of Somaliland
House of Representatives
Head Quarter Hargeisa.

Jamhuuriyadda Somaliland
Golaha wakiilada
Xarunta Hargeisa

Ref: GW/KF-32/712/2017 Date: 11/01/2017

Ujeedo:- Go'aanka ansixinta Wax-ka-bedelka iyo kaabista Xeerka Doorashooyinka Madaxtooyada iyo G/Deegaanka Lifaaqa 6aad ee JSL (Xeer Lr.20/2001)

GOLAHA WAKIILADA JSL

Markuu Arkay:- Qodobadda 9aad, 22aad, 23aad, 25aad, 39aad, 82aad, 83aad iyo 111aad ee Dastuurka Qaranka JSL.

Markuu Darsay: Nuqulkii Xeerkii soo baxay 2001 (Xeer LR. 20/2001) ee suurtageliyey ka digo-rogashada hab-beeleedka iyo xaqiijinta himiladda ummaddu ka dhursugaysay mudada dheer ee u tartanka xorta ah ee xilalka Qaranka, iyo Wax Ka bedelkiisi ee la ansixiyey Julay 2009, May 2010, Diisambar 2011, July 2012 iyo Ogost 2012.

Markuu Tixgeliyey:- Waayo-aragnimaddii laga dhaxlay doorashooyinkii Madaxtooyadda iyo Goleyaasha deegaanada ee sanadihii 2002, 2003, 2010, 2012.

Markuu Xaqiiqsaday:- Baahida loo qabo in la isku dhafo nuqulkii hore ee Xeerkan iyo wax ka bedelkiisa inta aan la burrin, laguna daro wax ka beddelka Kommishan Doorashhoyinka Qaranka u aragto daruuri hawlaha doorshooyinka iyo habka farsammo, ee ku saleysan waayo-aragnimadda iyo farsamooyinka cusub ee diiwangelinta oo lala jaanqaado.

Marku arkey:- Soo jeedinta Gudi-hoosaadkiisa Arrimaha Gudaha oo eegtey isla markaana golaha ugu soo warbixisey in la ansixiyo lifaaqa wax ka badalka Xeerkan.

Markuu u Arkay:- Go'aanka Ansixinta Xeer **LR:20/2001** ee Golaha Wakiiladu U Gudbiyeen Golaha Guurtida JSL Kuna taariikhaysnayd **05/01/2017.**

Markuu Arkey:- Go'aanka Ansixinta Xeer **LR:20/2001** ee Golaha Guurtida JSL kuna Taariikhaysnaa **08/01/2017**

Markuu Arkay:- In Golaha Guurtida wax-ka-bedel iyo kaabis ku samaynin kuna ansixiyeen lix iyo sodon **(36)** cod Wax-Ka-Bedelka Iyo Kaabista Xeerka Doorashooyinka Madaxtooyada Iyo G/Deegaanka Ee JSL **(Xeer Lr.20/2001)**

WUXUU

Halkan kuugu soo gudbinayaa Wax-Ka-Bedelka Iyo Kaabista Xeerka Doorashooyinka Madaxtooyada Iyo G/Deegaanka Ee JSL **(Xeer Lr.20/2001)**

Allaa Mahad Leh

C/risaaq Siciid Ayaanle — **Baashe Maxamed Faarax**

Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada — **K/s Gudoomiyaha Golaha Wakiilada**

WAX-KA-BEDELKA IYO KAABISTA XEERKA DOORASHOOYINKA MADAXTOOYADA IYO G/DEEGAANKA
LIFAAQA 6AAD
XEER Lr.20/2001

GOLAHA WAKIILADA JSL

Markuu Arkay:- Qodobadda 9aad, 22aad, 23aad, 25aad, 39aad, 82aad, 83aad, 111aad ee Dastuurka Qaranka JSL

Markuu Dersay:- Nuqulkii xeerkii soo baxay 2001(Xeer LR.20/2001) ee suurto galiyay ka digo-rogashada hab-beeleedka iyo xaqiijinta himiladda ummadu ka dhursugaysay muddada dheer ee u tartanka xorta ah ee xilalka Qaranka, iyo Wax ka beddelkiisii ee la ansixiyay july 2009, May 2010, diisambar 2011, July 2012, ogost 2012.

Markuu Tixgelayay:- waayo-aragnimadii laga dhaxley doorashooyinkii Madaxtooyada iyo Goleyaasha Deegaanada ee sanadihii 2002, 2003, 2010, 2012.

Markuu Xaqiiqsadey:- Baahida loo qabo in la isku dhafo nuqulkii hore ee xeerkan iyo wax ka bedelkiisa inta aan la abuurin, laguna daro wax ka bedelka Komishanka Doorashooyinka Qaranka u aragto daruuri hawlaha doorashooyinka iyo habka farsammo eek u salaysan waayo-aragnimadda

iyo farsamooyinka cusub ee diiwaangelinta oo lala jaanqaado.

Markuu Arkay:- Soo jeedinta Guddi-hoosaadkiisa Arrimaha Gudaha oo eegtay isla markaana Golaha ugu soo war bixisay in la ansixiyo lifaaqa wax ka bedelka xeerkan.

WUXUU ANSIXIYEY

Wax-Ka-Bedelka Iyo Kaabista Xeerka Doorashooyinka Madaxtooyada Iyo G/Deegaanka (Xeer Lr. 20/2001).

Wax-ka-beddelkani Xeerka Doorashooyinka Madaxtooyada iyo Goleyaasha Deegaanku waxa uu Xeerka kusoo kordhiyay Qodobka 1aad, oo ah Magaca Xeerka, sidaa darteed, lambarka qodobadu way is-beddeli doonaan (is-riixi doonaan), waxa kale oo lagu soo kordhiyay qaab-dhismeedka Qaybaha Xeerka, iyada oo la isku raaciyay sida ay isku leeyihiin, kuna haboon yihiin. Waxa Xeerka lagu soo daray Qaybta 12aad oo ka hadlaysa Ciqaabta ku-xadgudubyada Xeerka, iyo Qodobka 68aad oo ah Xeer-nidaamiye. Guud ahaan wax-ka-beddelkani waxa uu saamayn ku yeelan doonaa Qodobadii: 1aad, 2aad, 3aad, 5aad, 6aad, 7aad, 8aad, 9aad, 10aad, 11aad, 14aad, 16aad, 18aad, 19aad, 21aad, 22aad, 23aad, 24aad, 26aad, 27aad, 28aad, 29aad, 30aad, 32aad, 36aad, 39aad, 42aad, 43aad, 45aad, 46aad, 47aad, 49aad, 51aad, 52aad, 55aad, 57aad, 60aad, 64aad, 65aad ee Xeerka hadda jira, waxa kale oo wax-ka-bedelkani sameeyay isku-dhaf Xeerka ah (Consolidation), iyada oo la isku-gurey dhamaan wax-ka-beddeladii 1aad, 2aad, 3aad, 4aad, 5aad iyo kan lixaad ba, waxana ay isku noqon doonaan hal Xeer oo ah Isku-dhaf (consolidated version).

Qodobka 1aad

Magaca Xeerka

Wax-Ka-bedelka iyo Kaabista Xeerka Doorashooyinka Madaxtooyada iyo Goleyaasha Deegaanka (Xeer Lr 20/2001).

Qodobka 1aad oo noqonaya iminka Qodobka 2aad
Macnaha Erey-bixinta

Waxa wax ka bedel lagu sameeyay "ereyadaan soo socda"

DOORASHO

Doorasho: - Waxa loola jeedaa kala saaridda murashaxiinta u tartamaya xilalka, iyadoo lagu go'aan qaadanayo aqlabiyadda codadka dadka ay khusayso.

Waxa loo beddelay sidan:

Doorasho*: - Waxa loola jeedaa habka codbixiyayaashu ku soo doortaan wakiiladooda heer deegaan, heer gobol iyo heer qaran, iyada oo lagu go'aan qaadanayo aqlabiyada codadka la kala helay.*

GOOB-CODBIXIN

Goob-codbixin*:* waxa loola jeedaa goobaha tirooyin dadweynaha ka mid ah oo isku degaan dhaw ka dhiibanayaan codkooda.

Waxa loo beddelay sidan

Goob-codbixin*: waxa loola jeedaa goobta tirooyin dadweyne oo cayimani (ka diiwaangashani) ka dhiibanayaan codkooda maalinta doorashada.*

GOOB-DOORASHO

Goob-Doorasho: waxa loola jeedaa barta kulmisa goobo-codbixineed oo loogu talagalay in lagu kala saaro laba murashax iyo wixii ka badan.

Waxa loo beddelay sidan

Xarun-codbixineed: - ***waxa loola jeedaa barta kulmisa hal ama in ka badan oo goobo-codbixineed ah, oo la hawlgeliyo maalinta codbixinta.***

MURASHAX

Murashax: waxa loola jeedaa xubinta uu ururkiisu/xisbigiisu u soo magacaabay inuu u tartamo xil lagu heli karo doorasho.

Waxa loo beddelay sidan

Murashax: ***waxa loola jeedaa qof kasta oo u tartamaya xil doorasho lagu helo karo, kaas oo buuxiyay shuruudaha u dejisan si waafaqsan Xeerkan, isla markaana uu ururkiisu/xisbigiisu u soo xulay in uu ku tartamo doorasho mucayin ah.***

COD-BIXIYE

Cod-bixiye: waxa loola jeedaa qofka buuxiyey shuruudaha cod-bixinta ee go'aankiisa ku dhiibanaya cod.

Waxa loo beddelay sidan

Cod-bixiye: ***waxa loola jeedaa qofka buuxiyey shuruudaha cod-bixinta si waafaqsan Xeerkan kaas oo xaqiisa codbixineed gudanaya maalinta doorashada.***

DEGMO-DOORASHO

Degmo-doorasho: waxa loola jeedaa soohdimaha kulmiya ugu yaraan hal goob-doorasho.

Waxa loo beddelay sidan

Degmo-doorasho: ***waxa loola jeedaa degmooyinka ay u qaybsamaan Gobolada Dalka JSL, kuwaas oo leh gole deegaan oo lasoo doorto.***

KURSI

Kursi: waxa loola jeedaa jago-xil oo lagu hananayo doorasho hal qof.

Waxa loo beddelay sidan

Kursi: ***waxa loola jeedaa jago ama xil gole oo lagu tartamayo xili doorasho.***

ASTAAN/ASTAAMAHA

Astaan/Astaamaha: waxa loola jeedaa summadda ama calaamadda u gaarka ah hal xisbi/urur ee lagu aqoonsanayo.

Waxa loo beddelay sidan

Astaan/Astaamaha***: waxa loola jeedaa summad ama calaamad ama lambar u gaar ah hal xisbi/urur ama murashax oo lagu aqoonsanayo.***

LIIS/LIISASKA

Liis/Liisaska: waxa loola magacyada murashaxiinta uu soo gudbiyey xisbi/urur loona kala hormariyey siday u kala helayaan doorashada.

Waxa loo beddelay sidan

Liis/Liisaska: ***waxa loola jeedaa magacyada murashaxiinta uu soo gudbiyey xisbi/urur, ee u tartamaya doorasho mucayin ah.***

OLOLAHA DOORASHADA

Ololaha Doorashada: waxa loola jeedaa hawlgalka ay ururada/axsaabtu iyo murashaxiintoodu ugu tartamayaan iska dhaadhicinta iyo soo kala jiidashada cod-bixiyayaasha.

Waxa loo beddelay sidan

Ololaha Doorashada: ***waxa loola jeedaa hawlgalka dhaca muddada sharcigu jideeyay ee ka horaysa maalinta doorashada, ee ay ururada/axsaabtu iyo murashaxiintoodu kusoobandhigaaan barnaamijkooda siyaasadeed iyo mabaadiidooda. Hawlgalkaasi waxa ku jiri kara kulano, isu-soo baxyo (rallies), waraysiyo, doodo, IWM, iyadda oo ay ujeedadu tahay in ay hantaan/kasbadaan codbixiyayaasha.***

Qodobkii 2aad oo noqonaya iminka Qodobka 3aad

Xeerkan waxaa lagu maamulayaa doorashooyinka Golayaasha Degaanada iyo tan Madaxweynaha iyo Ku-xigeenka Madaxweynaha JSL.

Waa la beddelay, waxaana lagu kodhiyey farqado cusub oo ka hadlaya baaxada Xeerka (Scope) iyo mabaadiida guud ee Xeerku ka duulayo, waxana loo beddelay sidan:

Qodobka 3aad

Baaxadda Xeerkan iyo Mabaadiida Guud

1. **Xeerkani:**
   a) waxaa lagu maamulayaa doorashooyinka Madaxweynaha iyo Ku-xigeenka Madaxweynaha JSL iyo kuwa Golayaasha Degaanada;
   b) wuxu dajiyey aasaasida, awoodaha iyo waajibadaka iyo hawlaha Komishanka Doorashooyinka ee Qaranka ee madax banaan iyo xafiisyada doorashooyinka ee ay dhisto;

c) Wuxuu cayimaya falalka ku xadgudka habsimi-socodka iyo nidaamka doorashooyinka iyo ciqaabtooda.

2. Mabaadiida guud ee Xeerkani ku dhisan yahay waa:

a) Xoriyada muwaadiniintu u leeyihiin in ay adeegsadaanxuquuqdooda siyaasiga ah si waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka dalka JSL.

b) Hirgelinta doorashooyin xor iyo xalaal ah, oo ka madhan cabsi gelin, laaluush iyo musuqmaasuq, loona maamulay si madaxbanaan, dhexdhexaad ah, sugan, hufan, oo la xisaabtan leh.

<u>Qodobka 5aad oo noqonaya iminka Qodonka 6aad</u>

Qododka 5aad ee Xeerka oo imika noqonaya Qodobka 6aad, waxa lagu soo celiyay labada farqadood ee 4aad iyo 5aad oo lagu tirtiray lifaaqa 4aad, ee Xeerka, waxana lagu kordhiyay farqada shanaad laynka u danbeeya oo dhigaya "***waxase khasab ah in ay hal mar oo keliya codeeyaan***"

Waxaanu u dhigmayaa sidan:

<u>Qodobka 6aad</u>

<u>Shuruudaha Cod-bixiyaha</u>

4. Waa in uu yahay cod-bixiye ka diiwaangashan goobta uu ka codaynayo, haddii aanu kamid ahayn hawl-wadeennadda xafiiska goobta codbixinta, wakiilada xisbiyadda ee goobta ama ciidanka booliiska ee sida rasmiga ah ugu xilsaaran ilaalinta nidaamka goobta codbixinta.

5. Musharixiinta u tartamaya jagooyinka Madaxweynaha iyo ku-xigeenka waxa ay ka codayn karaan goob kasta oo cod-bixineed. Haseyeeshee hawl-wadeenada doorashada goobtu waa in ay arrintaas diiwaan-geliyaan. Waxase khasab ah in ay hal mar oo keliya ay codkooda dhiibtaan.

Qodobka 6aad oo noqonaya iminka Qodobka 7aad

Qodobkii 6aad ee Xeerka oo imika noqonaya, Qodoba 7aad, waxa farqadiisa 1aad lagu soo celiyay qaybta danbe ee u dhigan "***goobta uu cod-bixiye hanaan uga diiwaangashan yahay***" waxaanay u dhignaysaa sidan

Qodobka 7aad

Xuquuqda Cod-bixiyaha

a. Wuxuu codkiisa ka dhiiban karaa goobta uu cod-bixiye ahaan uga diiwaangashan yahay.

Qodobkii 7aad oo iminka noqonaya Qodobka 8aad

Qodobkii 7aad ee Xeerka oo hadda noqoya Qodobka 8aad, waxa lagu soo kordhiyay farqad 3aad oo cusub, waxaanu u dhigmayaa sidan:

Qodobka 8aad:

Shaqaalaha Dawladda & Hay'adaha Dawliga ah

6. Cadaynta shaqo ka tagista looma diido karo murashaxa, dibna loogama dhigi karo sabab la'aan.

Qodobkii 8aad oo iminka noqonaya Qodobka 9aad

Qodobkii 8aad ee Xeerka oo hadda noqonaya Qodoba 9aad, waxa lagu kordhiyay farqad 2aad oo u dhigan sidan:

Qodobka 9aad:

Wakhtiga Qabashada Doorashooyinka

2. Komishanka Doorashooyinku waa in ay cayimaan waqtiga doorashada 120 (boqol iyo labaatan cisho) ka hor waqtiga doorashadu dhacayso, Madaxweynuhu waa in uu 15 casho gudahood kusoo saaraa Degreetada cayimaadda muddada doorashada, kadib marka uu helo cayimaada Komishanka.

Qodobkii 9aad oo iminka noqonaya Qodobka 10aad

Qodobkii 9aad ee Xeerka oo hadda noqonaya Qodobka 10aad ee Xeerka, waxa lagu kordhiyay laba farqadood oo cusub, oo kala ah farqadda 7aad, iyo 8aad waxaanu u noqonayaa sidan:

Qodobka 10aad:

Goobaha Cod-bixinta

7. Haddii ay ku kala bixi waayaan xisbiyada/ururradacodadka gobolka waxa loo eegayaa wadarta guud ee codadka qaranka.

8. Haddii doorashada Madaxweynaha iyo Madaweyna ku-xigeenku oo ku saleysan aqlabiyadda hal dheeriga wadaarta codbixayaasha qaranka oo dhan, ay goobo ama degmo cayiman codbixintu ka dhiciweydu duruufo culus ama xaaladaha ku xusan faqaradda *4aad ee Qodobkan awgeed, Koomishanka Doorashooyinka Qarankuna uu sidaas ku xaqiijiyo,*

dacdooyinkaasi saameyn kuma yeelandoonaan habsami socodka iyo natiijada doorashada.

Qodobkii 10aad oo iminka noqonaya Qodobka 11aad

Qodobkii 10aad ee Xeerka oo hadda noqonaya Qodobka 11aad waxa lagu sameeyay wax-ka-bedel kooban waxana la kala horumariyey qaab-dhismeedka xafiisyada Komishanka, weedha ah "***xafiiska dhexe***", waxa lagu beddelay "***xarrunta dhexe"***. Waxanu noqonayaa sidan:

Qodobka 11aad:

Qaab-dhismeedka Komishanka Doorashooyinka

Qaab-dhismeedka xafiisyada Komishanka Doorashooyinku wuxuu ahaanayaa sidan:

1. ***Xarunta Dhexe*** ee doorashooyinka.
2. Xafiiska Gobolka ee doorashada.
3. Xafiiska Degmada ee doorashada.
4. Xafiiska goobta cod-bixinta doorashada.

Qodobkii 11aad oo iminka noqonaya Qodobka 12aad

Qodobkii 11aad ee Xeerka oo hadda noqonaya Qodobka 12aad ee Xeerka waxa lagu sameeyay wax-ka-bedel kooban waxana lagu daray ereyga "***xubnaha***" ciwaanka Qodobka, farqada shanaad, waxa lagu daray layn cusuboo ah "***iyo xeerarka kale ee khuseeya***, waxana lagu soo kodhiyay farqad cusub oo noqonaysa farqada 6aad.

Qodobka 12aad

Xubnaha Komishanka Doorashooyinka

5. Komishanka xil-gudashadiisa wuxuu ku salaynayaa Dastuurka JSL, Xeerkan, ***iyo xeerarka kale ee***

khuseeya, shirarkoodu wuxuu ku qabsoomayaa Kooram, go'aanadoodu waxay ku ansaxayaan aqlabiyad.

6. ***Komishanku waxa uu yeelan doonaa Xeer-hoosaad u gaar ah, oo waafaqsan Xeerkan.***

Qodobkii 14aad oo iminka noqonaya Qodobka 15aad

Qodobkii 14aad oo hada ah Qodobka 15aad ee Xeerka, waxa lagu sameeyay wax-ka-bedel soo socda:

Farqada 5aad ee Qodobka, ereyga u danbaysa ee ah "***inta aan Maxkamadda Sare ku dhawaaqin***" waxa loo beddelay "***inta aan Maxkamadda Sare Ansixin***"

Farqada 7aad, halkii ahayd "*in ay go'aan ka gaadhaan muranada*" waxa lagu kordhiyay "***iyo cabashooyinka***"

Farqada 8aad, oo ahayd "inay sameeyaan daraasad ku saabsan sidii dalka looga samayn lahaa goobo doorasho oo murashaxiin ku tartami karto" waxa loo beddelay "***inay sameeyaan daraasad ku saabsan sidii dalka looga samayn lahaa goobo doorasho, oo codbixiyayaashu codkooda ka dhiibtaan maalinta doorashada***".

Waxana qodobkaasi lagu kordhiyay farqadaha 10aad, 11aad, 12aad, 13aad, 14aad. Waxanu u dhigmayaa sidan:

Qodobka 15aad

Awoodaha Komishanka

5. Inay ku dhawaaqaan natiijooyinka doorashooyinka Madaxweynaha iyo ku-xigeenka si ku meel gaadh ah, inta aan Maxkamadda Sare ***ansixin***.

7. Inay go'aan ka gaadhaan muranada ***iyo cabashooyinka*** doorashada ee ka soo gaadha xafiisyada hoos yimaada.
8. Inay sameeyaan daraasad ku saabsan sidii dalka loogu samayn lahaa goobo doorasho, oo ***codbixiyayaashu codkooda ka dhiibtaan maalinta doorashada.***
Inuu diiwaan-geliyo cod-bixiyayaasha ka hor taariikhda doo

10. In ay ogolaadaan, jiheeyaan, isku xidhaan, hay'adaha caalamiga ah, kuwa maxaliga ah iyo daneeyayaasha kale ee ka shaqeeya hawlaha doorashooyinka.

11. In ay maamulaan hawlaha wacyigelinta codbixiyayaasha ee doorashooyinka.

12. In ay soo saaraan Xeer-nidaamiye (regulations), Habraacyo, go'aanno, Xeerar Anshax (Codes of Conduct), oon ka hor imanayn Xeerkani iyo xeerarka kale ee doorashooyinka khuseeya.

13. In ay awood u leeyihiin in ay dejiyaan habab maamuleed oo ku saabsan ilaalinta, baadhista iyo dabagelkaku dhaqanka xeerarka anshaxa arrimaha doorashooyinka ee xisbiyadda/ururada iyo murashaxiintooda iyo talaabooyinka idaariga ah, oo ay ku jiraan ganaax idaari ah, oo laga qaadi karo ku xadgudbyada axkaamta xeeraka anshaxa.

14. Komishanku waxa uu leeyahay awoodaha kale ee ku xusan xeerarka kale ee dhaqangalka ah.

Qodobkii 16aad oo iminka noqonaya Qodobka 17aad

Qodobkii 16aad ee Xeerka oo hadda noqonaya Qodobka 17aad ee Xeerka waxa lagu sameeyay wax-ka bedel kooban, farqadiisa koowaad iyo labaad.

Farqada 1aad, oo u dhignayd "*Xafiiska goobta cod-bixinta ee doorashu wuxuu ka koobmi doonaa Gudoomiye iyo laba hubiye. Hubiyaha ugu da'da weyn ayaa noqonaya gudoomiye xigeen. Waxa kale oo uu yeelanayaa xoghayn*"

Waxa loo beddelay sidan soo socota:

"Xafiiska goobta cod-bixinta ee doorashu wuxuu ka koobmi doonaa guddoomiye, guddoomiye ku-xigeen, hubiye, iyo xoghaye".

Farqada labaad ee isla Qodobkani oo u dhignayd:

Gudoomiyaha, Xoghayaha iyo labada hubiye waxaa magacaabaya Komishanka, waxaanu samayn karaa isku bedelid haddii loo baahdo.

Waxa loo beddelay sidan:

Guddoomiyaha, guddoomiye ku-xigeenka, xoghayaha iyo hubiyaha waxaa magacaabaya Komishanka, waxaanu samayn karaa isku bedelid haddii loo baahdo.

Qodobkii 18aad oo iminka noqonaya Qodobka 19aad

Qodbkii 18aad ee Xeerka oo hadda noqonaya Qodobka 19aad ee Xeerka, waxa lagu kordhiyay farqad 3aad oo u dhigan sidan:

3. ***Haddii loo baahdo Komishanka Doorashooyinku waxa uu awood u leeyahay in uu kordhiyo tirada shaqaalaha ee ka hawl-galaysa goob-codbineeed, heer degmo, iyo/ama gobol.***

Qodobkii 19aad oo iminka noqonaya Qodobka 20aad

Qodobka 19aad, oo hadda noqonaya Qodobka 20aad ee Xeerka farqada 1aad, waxa lagu sameeyay wax-ka-bedel kooban, waxana la beddelay halka 60 maalmood, waxa lagu celiyay ***15 maalmood***. Waxaanay u dhigmaysaa sidan:

1. ***Xubnaha Komishanku u magacaabo xafiisyada doorashada waa in loo sheego in xilka loo magacaabay ugu yaraan 15 maalmood ka hor taariikhda la qabanayo codbixinta***.

Qodobkii 21aad oo iminka noqonaya Qodobka 22aad

Qodobka 21aad ee Xeerka oo hadda noqonaya Qodobka 22aad, faraqdiisa afraad qaybta u danbaysa oo u dhignayd:

"Komishanku wuxuu leeyahay dhawrsanaan la mid ah ta Golaha Wasiirada mudada uu xilka hayo. Dhawrsanaan ka qaadistoodana waxa loo marayaa sida uu tilmaamayo qodobada 94(8) iyo 96(4) ee Dastuurka".

Waxa loo beddelay sidan:

"Komishanku wuxuu leeyahay dhawrsanaan iyo habmaamuuska la mid ah ta Golaha Wasiirada mudada uu xilka hayo. *Dhawrsanaan ka qaadistoodana waxa loo marayaa sida uu tilmaamayo qodobada 94(8) iyo 96(4) ee Dastuurka"*

Qodobkii 22aad oo iminka noqonaya Qodobka 23aad

Qodobka 22aad oo hadda noqonaya Qodobka 23aad, ciwaanka Qodobka oo ahaa "***Habka Doorasho***" waxa lagu beddelay "***Habka Doorashooyinka Deegaanadda***"

Farqada 1aad ee Qodobkaasi, waxa laga saaray qaybta danbe ee ka hadlaysa habka doorashada Madaxtooyada oo hadda noqonaysa qodob gaar ah oo, qodobkan ku xiga.

Farqada 3aad ee Qodobkaasi halkii ahayd "***lambar u gaar ah***" waxa lagu beddelay "***astaan u gaar ah***"

Farqada 6aad, halkii ahayd "***dadka loo soo bandhigay in ay ka qayb gelayaan***" waxa lagu beddelay "***murashixiinta ka qayb galaya***".

Farqada 7aad, waxa lagu kordhiyay "***doorashada deegaanka***" waxaanay u dhigmaysaa sidan:

"Degaamada aanu tartan ka jirin ee la soo bandhigo ***doorasha deegaanka*** liis keliya, cod-bixin laga samayn maayo, waxana la qaadanayaa dadka loo soo magacaabay Degaanadaas, iyadoo ku jaan go'an tiradii degmada laga doonayay, waxana loo raacayaa sida loo soo kala horaysiiyey".

Qodobkii 36aad oo loo soo rarey Qodobka 24aad

Qodobka 36aad ee Xeerka, oo ka hadlayay habka doorashada Madaxweynaha iyo ku-xigeenka madaxweynaha, waa la soo raray, waxaana laga dhigay Qodobka 24aad, waaxana xaga danbe lagaga daray qaybta laga jaray Qodobka hore ee khuseysay doorashada madaxweynaha iyo ku-xigeenka madaxweyanaha. Waxaanu u dhigmayaa sidan soo socota:

Qodobka 24aad

Habka Doorashada Madaxweynaha iyo ku xigeenka Madaxweynaha

Habka lagu dooranayo Madaxweynaha iyo ku xigeenka Madaxweynaha wuxuu ahaanayaa kan ku

tilmaaman Qodobka 83aad ee Dastuurka JSL, Faqradihiisa 1aad, 2aad, 3aad, iyo 4aad, Waana habka aqlabiyadda hal dheeriga ah (majority system), sida Distuurku tilmaamay.

QAYBTA 4AAD Qodobada 33aad, Qodobka 34aad iyo 35aad waa la rarey waxayna noqonayaan Qodobka 25aad, Qodobka 26aad iyo Qodobka 27aad

Qaybta afraad, oo ka hadlaysa murashixiinta, waa lasoo raray waxana loo kala horaysiiyay sida ay hawshu u kala horayso. Shuruudaha murashaxa oo markii hore ahaa Qodobka 33aad, waxa uu noqonayaa Qodobka 25aad, qodobkii 34naad waxa uu noqonayaa Qodobka 26aad, qodobkii 35aad waxa uu noqonayaa, Qodobka 27aad, sidaa darteed lambarka qodobada danbe wax baa iska bedeli doona.

Qodobka 23aad oo iminka noqdey Qodobka 28aad

Qodobkii 23aad ee Xeerka oo imika ah Qodobka 28aad, kana hadlaya qaabka soo bandhigida murashixiinta, farqadiisa koowaad oo ahayd magaca murashaxa oo saddexan waxa loo beddelay "**magaca murashaxa oo affaran**".

Farqada 3aad, ereyga "***ka dhex dilaaca***" waxa lagu beddelay "***ka soo baxa***". Isla farqadaasi, ereyga ah "***golaha dhexe***" waxa loo beddelay "***guddida fulinta***".

Farqada 4aad ee Qodobka 28aad, halkii ahayd "***20 maalmood***" waxa lagu beddelay "***30 maalmood***".

Farqadda 5aad, halkii ahayd "***7 maalmood***" waxa loo beddelay "***20 maalmood***".

Farqada 6aad, halkii ahayd "***7 maalmood***" waxa loo beddelay "***20 maalmood***" waxana laga gooyay qaybta danbe oo noqonaysa farqad cusub.

Qodobka 24aad oo iminka noqdey Qodobka 29aad

Qodobka 24aad oo hadda noqonaya Qodobka 29aad, waa la tirtiray, waxaanau u dhignaa sidan:

1. Lambarrada murashixiinta ee Urrurda/Xisbiyadu waa in ay kala duwanaadaan marka lsoo bandhigayo, iyadoo la raacaayo habka uu Komishanku usoo dhigay.

Waxana loo beddelay, oo uu noqonayaa sidan:

Qodobka 29aad

Astaamaha Liistooyinka Murashaxiinta

1) Astaamaha murashixiinta doorasha Madaweynaha iyo ku-xiggeenkiisu waxay ahaanayaan astaamaha xisbiyada qaran ee soo sharaxay.

2) Astaamaha liisaska murashixiinta ururada/xisbiyada ee doorashooyinka golayaasha deegaanka ee habka liiska furan waa in ay kala duwanaadan marka la soo bandhigayo, Kommishanka Doorashooyinka Qaranka ayaa ku soo saaraysa xeer-nidaamiye habka loo qeybinayo iyo shuruudaha isticmaalkooda.

3) Komishanka Doorashooyinka ayaa u astayn doona murashax kasta astaan u gaar ah oo uu kaga duwan yahay/tahay murashixiinta kale.

4) Astaamuhu waa in ay noqdaan qaar kala duwan oo si dhibyar loo aqoonsan karo, waana in aanay ka muuqan calaamado dawladeed, qabyaaladeed, dariiqo ama diimeed, ayna waafaqsanyihiin xeer-nidaamiyaha Kommishanka Qaranka ee ku xusan faqrada 2aad ee Qodokan.

Qodobka 30aad

Qodobka 30aad, oo ah deebaajiga murashixiinta waxa lagu sameeyay wax-ka-bedel, halkii uu ka ahaa 5milyan murashixiinta Madaxtooyada waxa laga dhigay 100 milyan oo shilin, halkii uu murashixiinta goleyaasha deegaanka ka ahaa 1 milyan, waxa laga dhigay 5 milyan oo shilin, waxaanu noqonayaa sidan.

Qodobka 30aad

Deebaaji

Murashaxiinta u tartamaya xilalka waxay bixinayaan deebaaji aan celin lahayn, oo kala noqonaya sidan: -

a) Sl.Sh. 100,000, 000 (Boqol Milyan oo Shilin) Murashaxiinta Madaxtooyada midkiiba;

b) Sl.Sh 5,000,000 (Shan Milyan oo Shilin) Murashaxiinta Golayaasha Deegaanka midkiiba.

Qodobka 26aad oo iminka noqdey Qodobka 31aad

Qodobkii 26aad ee Xeerka oo hadda ah, Qodobka 31aad, farqada 2aad halka u danbaysa waxa lagu kordhiyay:

"***Oo aan ka badnayn 72 saacadood***" waxaanay u dhigmaysaa sidan:

Xafiiska Komishanka ama xafiisyadiisa doorashada ee degmooyinka waxay hubinayaan in murashaxiinta liisaska ku qorani buuxinayaan dhamaan shuruudaha u dhigan heerkooda, Murashaxa aan buuxin shuruudaha waxa lagu celinayaa urur/xisbigii soo sharaxey si ay bedelkiisa u keenaan muddo loo cayimey, ***oo aan ka badnayn 72 saacadood***.

Qodobka 27aad oo iminka noqdey Qodobka 32aad

Qodobkii 27aad, ciwaanka Qodobka ee ah "***Sheegida***" waxa lagu beddelay "***bandhigida***" farqada 1aad ee Qodobka weedha ah "***qaabka sheegida***" waxa lagu beddelay "***qaabka bandhigida***" isla farqada 2aad, weedha ah "***qaab sheegid liisaska***" waxa lagu beddelay "***qaab soo bandhigida liisaska***" waxaanay u dhigmaysaa sidan:

Qodobka 32aad

Bandhigida Liisaska Murashaxiinta

1. Komishanka iyo xafiisyadooda degmo kasta waa inay diyaariyaan qaabka bandhigida murashaxiinta iyagoo u habaynaya siday u kala horeeyaan, kana muuqato astaamahoodii.

2. Komishanka iyo xafiisyadiisa goob kasta oo cod-bixineed waa inay qoraal ahaan u diyaariyo qaab soo bandhigida liisaska murashaxiinta degmada iyadoo lagu dhajinayo goobaha cod-bixinta degmada.

Qodobka 28aad oo iminka noqdey Qodobka 33aad

Qodobka 28aad ee Xeerka oo hadda ah Qodobka 33aad, farqadiisa 2aad, 3aad, iyo 4aad waa la tirtiray waxana lagu beddelay laba farqadood oo keliya, farqadaasi la tirtiray oo u dhignaa sidan:

2) Haddii muddada olole doorasho ku beeganto bisha barakaysan ee Ramadaan, si xisbigii doonaa uu miisaanka ololihiisa uga soo hormariyo bisha ramadaan, waxa ololaha doorashadu bilaabmayaa 60(lixdan) maalmood ka hor maalinta cod-bixinta, waxaanu dhamaanayaa ka hor maalinta cod-bixinta.

3) Ololaha Madaxtooyada ee xilligani (Doorashda Madaxtooyadda ee Sanadka 2010), waxa uu noqonayaa muddo saddex todobaad ah (21 maalmood). Waxa uu ololuhu bilaabmayaa 23 maalmood ka hor maalinta doorashadu ay dhacayso, waxaanu dhamaanayaa 48 saac ka hor maalinta codbixinta. Haseyeeshee, haddii ololaha doorashu uu ku beegmo bisha Ramadaan waxa la adeegsanayaa Qodobka 28aad, Farqadda 2aad ee wax-ka-bedelka iyo kaabista Lifaaqa u ah Xeer Lr 20/2001 ee Golaha Wakiiladu ansixiyay 26/07/2009.
4) Ololaha Doorashada Goleyaasha Deegaanka ee xilligan ay Xisbiyada/Urruradu tartamayaan waxa ay noqonaysaa muddo dhan affar todobaad oo hal maalin la' (27) maalmood. Waxa uu ololuhu bilaabmayaa 29 maalmood ka hor maalinta doorashadu ay dhacayso, waxaanu dhamaanayaa 48 saac ka hor maalinta codbixinta. Jadwalka Ololaha Doorashada waxaa soo saaraya Komishanka Doorashooyinka Qaranka.

Farqadaasi 2aad, 3aad iyo 4aad, waa la tirtiray, waxaana lagu beddelay farqada 2aad, iyo 3aad oo u dhigan sidan:

2. ***Komishanka Doorashooyinka Qaranka ayaa go'aaminaya muddada uu socon doono ololaha doorashooyinka Madaxtooyada iyo Goleyaasha Deegaanka iyaga oo qiimaynaya xaalada markaa taagan, waxana ku waajib ah in ay siiyaan xisbiyada/ururada tartamaya tiro maalmo ah oo is-leeg.***

3. Jadwalka ololaha doorashada waxaa soo saaraya Komishanka Doorashooyinka, muddada ololaha doorasho waa in aanay ka yaraan 21 maalmood.

Qodobka 29aad oo iminka noqdey Qodobka 34aad

Qododbkii 29aad ee Xeerka, oo hadda ah Qodobka 34aad, waxa lagu kordhiyay farqad cusub oo noqonaysa farqada 3aad una dhigan sidan:

3) Magaalo/tuulo kasta waxa banaanbax ka samayn kara hal xisbi/urur maalintiiba.

Qodobka 30aad oo iminka noqdey Qodobka 35aad

Qodobkii 30aad ee Xeerka oo hadda ah, Qodobka 35aad, farqadiisa 2aad waxa lagu kordhiyay "***xafiisyada komishanka doorashooyinka qaranka, ururada caalamiga ah, ururada bulshada, goobaha waxbarashada iwm***" waxanay u dhigmaysaa sidan:

2) Lama ogola in boodhadhka iyo waraaqaha ololaha doorashooyinka lagu dhejiyo masaajidada, xafiisyada & gaadiidka dawladda, xarumaha diblomaasiyiinta, ***xafiisyada Komishanka Doorashooyinka Qaranka & ururada caalamiga ah, urrurada bulshada, goobaha wax barashada iwm.***

Qodobka 32aad oo iminka noqdey Qodobka 37aad

Qodobka 32aad oo haddaba ah Qodobka 37aad, ee Xeerka Farqadiisa 2aad, halka ah "*tabasho ama cadayn ah*" waxa lagu beddelay "***tabasho ama cabasho ah***" ee ay qabaan.

Waxaanay u dhigmaysaa sidan:

2) Wakiilada ay ururadu/axsaabtu soo dirsadeen waa inay goob-joog ahaadaan marka xafiiska doorashadu hawsha hayo, soona jeediyaan wixii ***tabasho ama cabasho*** ah ee ay qabaan (haddii ay jirto), taas oo la diiwaangelinayo.

Isla qodobkaasi waxa lagu soo kordhiyay farqad cusub oo noqonaysa (E) una dhigan sidan:

E) <u>Waa in uu/ay u hogaansamo shuruucda iyo xeerarka doorashooyinka ee khuseeya shaqadiisa/deeda.</u>

QAYBTA 6AAD Halkii ay ahayd "NIDAAMKA MAAMULKA DOORASHADA" waxa lagu bedelay "HAWLAHA DIYAARINTA DOORASHADA"

<u>Qodobka 37aad oo iminka noqdey Qodobka 38aad</u>

Qodobkii 37aad ee Xeerka oo imika noqonaya Qodobka 38aad ee Xeerka, ciwaanka Qodobka, halkii ahayd "*qalabka xafiisyada doorashooyinka*" waxa lagu beddelay "***<u>qalabka goobta doorashooyinka</u>***".

Isla qodobkaasi waxa lagu soo daray farqad cusub oo ah (F) una dhigan sidan:

F) <u>Liiska rasmiga ah ee cod-bixiyayaasha goobta.</u>

Isla farqada 2aad ee Qodobkaasi, waxa lagu sameeyay wax ka bedel, halka ah "*haddii wadajir loo qabanayo doorashooyinka deegaanka*" waxa lagu beddelay "***<u>haddii wadajir loo qabanayo laba doorasho</u>***".

Qodobkaasi waxa dib-loogu soo celiyay farqadaha 6aad, 7aad, iyo 9aad, oo markii hore lagu tirtiray lifaaqa 4aad ee Xeerka. Waxaanay u dhigmayaan sidan soo socota:

<u>6. Komishanku waxa uu goob kasta oo cod-bixineed u diyaarinayaa waraaqo cod-bixineed oo dheeraad ah oo aanay tiradoodu ka badnayn 2% tirada waraaqaha ee ku xusan farqadda 5aad ee</u>

Qodobkan, lambarradooda iyo goobaha cod-bixineed ee loo kala dirayana lagu qorayo diiwaan gaar ah oo Komishanka Doorashooyinka Qaranku leeyahay, waxana goobtaa loogu ridayaa buqshad xidhan oo gaar ah oo lagu rido sanduuqa doorashada ee goobta cod-bixineed.

7. Waraaqaha dheeraadka ah waxa loo adeegsanayaa oo keliya beddelaadda waraaqaha cod-bixineed ee xumaada intaan lagu codayn, taas oo ay waajib tahay in ay ku wada qancaan guddoomiyaha iyo wakiilada axsaabta/Ururrada u jooga goobta codbixinta. Mar kasta oo warqad ka mid ah waraaqaha dheeraadka ah lagu codeeyana waa in la diiwaan-geliyaa asbaabaha kalifay.

9. Komishanka Doorashooyinka Qaranku isaga oo qiimeeyanaya baahida xafiisyada gobolada, degmooyinka iyo goobaha cod-bixinta, waxa uu awood u leeyahay in uu kordhiyo, dhimo, ama qalab cusub oo lagama maarmaan ah ku darro qalabka loo dirayo goobaha doorashooyinka, waana in uu go'aan Komishan kusoo saaraa.

Qodobka 38aad oo iminka noqdey Qodobka 39aad

Qodobkii 38aad, ee Xeerka oo hadda ah Qodobka 39aad, waxa lagu soo daray farqad cusub oo noqonaysa farqada 2aad una dhigan sidan:

2. **Komishanka Doorashooyinka ayaa go'aamin doona Astaamaha kale ee ay yeelanayso waraqada codbixintu.**

Qodobka 42aad oo iminka noqdey Qodobka 43aad

Qodobka 42aad oo imika ah Qodobka 43aad waxa lagu kordhiyay farqad cusub oo 6aad una dhigan sidan:

QAYBTA 7AAD loogu magac daray **"BILAWGA HAWLAHA GOOBTA CODBIXINTA"**

Qodobka 43aad

Xafiiska Goobta Cod-bixinta

6. Komishanka Doorashooyinka Qaranku waxa uu soo saarayaa habraacyo dhamays tiran oo lagu faahfaahinayo* hawlqabadka *goobta codbixinta, kaas oo hawlwadeenada goobta lagu tababari doono.

Qodobkaasi 43aad, faqrada (D) oo ahayd "*si nidaamsan ugu rido weel xafidan*" waxa lagu beddelay ***"si nidaamsan ugu ilaaliyo meel xafidan"***

Waxaanay u dhigan tahay sidan: -

(D) Markuu hubiyo isaga iyo hawl-wadeenadiisa iyo wakiiladu in xidhmooyinka ay ku jiraan shaambada goobta iyo waraaqaha cod-bixintu lingaxan yihiin waa inuu furo xidhmooyinka oo waraaqaha cod-bixinta la dhaco shaambada goobta, oo si nidaamsan ugu ilaaliyo meel xafidan. Waxaa reebban in uu markaas joogo qof aan ahayn inta goobta ku qoran.

Qodobka 39ad oo iminka noqdey Qodobka 40aad

Qodobka 39aad ee Xeerka oo hadda noqonaya Qodobka 40aad, farqada 1aad waxa lagu sameeyay wax-ka-bedel kooban, halka ah "*laba qol oo yar yar*" waxa lagu beddelay "***laba ilo-xidh oo yar yar***" isla qodobkaasi waxa lagu soo celiyay farqada 3aad, oo lagu tirtiray lifaaqii 4aad ee Xeerka waxaanu u dhigmayaa sidan soo socota:

3) Liiska dadka ka diiwaan-gashan isku goob doorasho, waxa ay qoraal ahaan u kala horaynayaan siday xuruuftu u kala horreeyaan iyadoo laga duulayo magacooda 1aad, haddii ay ku kala bixi waayaana magacooda 2aad, haddii ay kaas ku kala bixi waayaana kooda 3aad, haddii ay kaas ka sinmaanna kooda 4aad.

Qodobka 43aad oo iminka noqdey Qodobka 44aad

Qodobka 43aad oo hada ah Qodobka 44aad, faqradiisa 3aad waxa lagu daray "***Hawlwadeenada goobta, wakiilada axsaabta/ururada, goob joogayaasha caalamiga ah iyo kuwa maxaliga ah***"

Waxay u dhigmaysaa sidan:

2. ***Saraakiisha Booliska, masuuliyiinta dowalada, hawlwadeenada goobta, wakiilada axsaabta/ururada, goob-joogayaasha caalamiga ah iyo kuwa maxaliga ah waa in ay fuliyaan codsiyada gudoomiyaha goobta si loo hubiyo in si dhib yer codka loo bixiyo oo aanay dhicin in lagu ururo miiska hawl-wadeenada goobta agteeda***

Qodobka 43aad oo hadda ah Qodobka 44aad, farqadiisa 2aad, waxa lagu daray **"*waa in tixgelin la siiyaa inuu ugu hormaro haddii ay jirto qof naafo ah, hooyo uur leh ama ilmo sidata, qof waayeel ah*"** waxaanay u dhigmaysaa sidan:

2. ***Waxa reebban in cod-bixiyayaashu hub la yimaadaan goobta, markiiba qof ayaa gelaya, iyadoo lookala hor marinayo sidii loo soo kala horeeyay, hasayeeshee waa in tixgelin la siiyaa inuu ugu hormaro haddii ay jirto qof naafo ah, hooyo uur leh ama ilmo sidata, qof waayeel ah, ama qof ka shaqaynaya hawsha doorashada oo doonaya inuu codkiisa bixiyo.***

Qodobka 44aad oo iminka noqdey Qodobka 46aad

Qodobka 45aad, oo hada ah Qodobka 46aad, waxa dib loo soo celiyay farqada 1aad, 2aad, 3aad, oo lagu tirtiray lifaaqa 4aad ee Xeerka, waxaana lagu soo kordhiyay farqad cusub oo 4aad waxaanu u dhigmayaa qodobku sidan:



Qodobka 46aad

Talaabooyinka Ka Horeeya Cod-bixinta

1. **In uu Kaadhkiisa cod-bixinta u dhiibo Guddoomiye-ku-xigeenka goobta cod-bixinta, si uu u hubiyo inuu yahay kaadh cod-bixineed oo sax ah (valid), isaga ooka hubinaaya tilmaaha kaadhka codbixiyaha liiska codbixiyayaasha ansaxa ah.horena aan loogu codayn maalintaa codbixinta,isla markaana hubiyo in far-yaradiisa bidix, haddii aanu lahaynna far-yaradiisa midig, haddii aanu taana lahayna meelaha muuqda ee jidhkiisa inaanu kaga oollin khadka aan masaxmini, dabadeedna uu kaadhka ugu gudbiyo xoghayaha goobta, iyadda oo ay kaadhka isha sii marinayaan wakiila xisbiyaddu, haddii ay goobta ku sugan yihiin.**

2. **Marka uu xoghayaha goobtu ka helo magaca kaadhka ku qoran liiska rasmiga ah ee cod-bixiyayaasha goobta, isla markaana uu hubiyo inay is waafaqsanyihiin lambarka kaadhka ku qoran iyo lambarka kaadhka ugu diiwaangashan liiska cod-bixiyayaashu, waa in uu codbixiyuhu suulka bidix saaro meesha liiska codbixiyayaasha ah ee loogu talo galay.**

3. **In tallaabooyinka farqadda sare ee Qodobkan ku xusan u guto si dhamaystiran oo nidaamka waafaqsan, kuna wada qancaan hawlwadeenada iyo wakiilada axsaabtu ee goobta codbixinta ku sugan**

ayaa cod-bixiyaha loo goyn karaa warqadda cod-bixinta.

4. **Komishanka Doorashooyinka Qaranka ayaa xaddidi doona tiradda codbixiyayaasha ee hal goob ka codaynaya, iyaga oo u kala qaybin kara haddii tirada codbixiyayaasha ee hal goob ka codayn karaa ay ka bataan tiro xaddidan oo Komishanku goyn doono, iyaga oo ku xisaabtamaya in dhamaan codbixiyayaasha diiwaagashani codkooda wada dhiiban karaan maalinta codbixinta.**

Qodobkii 46aad oo iminka noqdey Qodobkii 47aad

Qodobka 46aad, oo hadda ah Qodobka 47aad, farqadiisa 1aad oo u dhignayd:

Waxa codkisa dhiiban kara cod-bixiyaha taga goobta cod-bixinta oo codkiisa ku ridi kara sanduuqa.

Waa la beddelay, waxana loo beddelay sidan:

Waxa codkiisa dhiiban kara cod-bixiyaha taga goobta cod-bixinta, ee buuxiyey shuruudaha codbixinta.

Farqada 3aad ee Qodobka, inta u danbaysa oo u dhignayd:

Wakiilka xisbiga/ururka uu u codaynaayo murashaxiisu goob-joog wuu ka ahaan karaa.

Waa la beddelay, waxana loo beddelay sidan:

Wakiilada xisbiyada/ururrada waa in la tusaa cida uu doortay, codbixiyuhu ee loo calaamadiyey.

Qodobkii 47aad oo iminka noqdey Qodobkaii48aad

Qodobka 47aad oo hadda ah Qodobka 48aad, farqada 1aad, halka ah "*xoghayaha goobtu*" waxa lagu beddelay "***gudoomiyaha goobtu***"

Waxa kale oo qodobkaasi farqadiisa 1aad waxa lagu soo celiyay xarfaha (b iyo c), farqadiisa saddexaad ereyga "*qolka yar*" waxa lagu beddelay "***ilo-xidhka***" waxana lagu soo celiyay qodobkaasi qaybaha hore ee farqada 4aad iyo 6aad, farqada 7aad, 8aad, 9aad, halka farqada 13aad lagu soo celiyay ereyga "**kaadh codbixineed**", lagana saaray weedha ah "***haday suurtogal noqotana***" waxaanu qodobkaasi u dhigmayaa sidan soo socota:

b) Kaadhka codbixiyaha u gudbinayaa hubiyaha goobta;
c) xariijin ka talaabinayaa magaca codbixiyaha iyo dhamaan xogta kale ee cod-bixiyaha eeku qoran khaanadaha cod-bixiyahaas ee liiska, isaga oo adeegsanaya mastaradda iyo qalin, ilaaliyana in magaca cod-bixiyaha iyo xogtiisa kaleba la akhriyi karo xariijin marinta ka dib.

3)Cod-bixiyuhu wuxuu dabadeed gelayaa ilo-xidhka waraaqaha lagu soo calaamadiyo.

6) ***Cod-bixiyuhu wuxuu dabadeed u imaanayaa hubiyaha oo loo soo gudbiyey kaadhkiisa***, kaas oo faryaradiisa bidix u marinaaya khadka aan masaxmin, haddii aanu far-yaro bidix lahayna, far-yarada gacanta midig, haddii aanu labada far-yaro midna lahayna farta kale ee kusoo xigta iyadoo gacanta bidix mudnaanta khadaynta la siinayo, haddii aanu laba gacmood midna lahayna meeshii kale ee jidhkiisa ah ee muuqanaysa.

7) Intaas kadib ayuu hubiyahu siinayaa cod-bixiyaha kaadhkiisii, cod-bixiyuhuna waa in uu si deg-deg ah uga baxaa goobta cod-bixinta isaga oo anshaxa dhawraya.

8) Qof kasta oo ka mid ah hawl-wadeenadda doorasho ee goobta cod-bixinta, wakiillada xisbiyadda ee goobta cod-bixinta iyo ciidanka booliiska ee sida rasmiga ah ugu xilsaaran ilaalinta nidaamka doorashada ee goobta cod-bixintu, wuxuu codkiisa dhiiban karaa (isaga oo u maraya tallaabooyinka ku xusan 1-6 ee Qodobkan) isla marka goobta codbixinta la diyaariyo, ee hawl-wadeenada goobta cod-bixintu iyo wakiillada xisbiyadda ee goobta-codbixintu ay isla hubiyaan in kaadhka qofkaasi yahay mid sax ah (valid) horena aan loogu codayn, foomka uu Komishanka Doorashooyinku Qaranku u soo diyaariyena lago qoro:

a) Magaciisa oo afarran;
b) Lambarka iyo goobta uu ka diiwaangashan yahay;
c) Lambarka iyo magaca goobta uu ka codaynayo;
d) Xilka uu ka hayo goobta cod-bixinta;
e) Saxeexa suulkiisa bidixna uu dhiga meesha foomka loogaga talo-galay.

9) Qof kasta oo ka mid ah dadka ku xusan farqadda 8aad ee Qodobkan waxa kaadhkiisa codbixinta haynaya, guddoomiyaha Goobta cod-bixinta oo dib usiin kara uun ka dib marka lasoo gebagebeeyo hawsha doorasho ee goobta cod-bixinta.

12. Haddii uu cod-bixiye la yimaaddo goob cod-bixineed kaadh aan waafaqsanayn goobtaas, Hubiyuhu wuxuu u tilmaamayaa goobta cod-bixineed ee uu kaadhkiisu waafaqsan yahay.

13. Cod-bixiye kasta oo ***sita kaadh codbixineed oo aanu lahayn*** ama waraaqo cod-bixineed oo dheeraad ah ama ka duwan kuwa la isticmaalayo, Guddoomiyuhu wuxuu si deg-deg ah u amrayaa in laga qaado, waxaanu si deg-deg ah ugu dhiibayaa ciidanka nabadgelyada si dacwad loogu oogo, dhacdadaasna qoraal ayaa lagu diiwaangellinayaa.

Qodobka 49aad oo ciwaankiisu ahaa "hawlgalka codbixinta" waxa lagu beddelay "muddada codbixinta" waxana qodobkaasi lagu kordhiyay laba farqadood oo cusub oo ah 3aad iyo 4aad waxaanu noqonayaa sidan soo socota:

3. Marka ay saacadu gaadho 6:00 fiidnimo, askarta ilaalinaysa safku waxa ay calaamadin doonaan qofka ugu danbeeya dadka taagan safka, waxaanay u ogolaan doonaan in ay codeeyaan inta safka ku jirta oo kali ahi.

4. Komishanka Doorashooyinka ayaa go'aamin doona goobaha xaalado gaar ahi la soo darsaan maalinta doorashada.

Qodobkii 49aad oo iminka noqdey Qodobkii 50aad

Qodobka 49aad, ee Xeerka, oo hadda ah Qodobka 50aad waxa lagu daray farqad labaad oo u dhigan sidan:

2. Haddii ay jirto amni darro halis galin karta hawlwadeenada goobta iyo dadka codbixiyayaasha, guddoomiyaha goobtu waxa uu si ku meel gaadh ah u xidhayaa goobta codbixinta, waana in uu sida ugu dhakhsaha badan u soo wargaliyaa Komishanka Doorashooyinka ee heer degmo, gobol, iyo heer qaran.

QAYBTA 9AAD Qodobkii 50aad oo iminka noqdey Qodobka 51aad



Qaybta Sagaalaad ee Xeerka ayaa bilaabmaysa Qodobka 50aad oo hadda ah Qodobka 51aad, waxana qaybta ciwaankeedu noqonayaa "TIRINTA CODADKA"

Qodobkii 51aad oo iminka noqdey Qodobkii52aad

Qodobka 51aad oo hadda ah Qodobka 52aad, farqadiisa 1aad, ereyga "hubiyuhu" waxa lagu beddelay "***gudoomiye-ku-xigeenku***" ereyga ah "sanduuqa loo sameeyay" waxa lagu beddelay "***buqshada 3aad***". Isla farqada labaad weedha ah "*sanduuqa lagu ridayo*" waxa lagu beddelay "***buqshada lagu ridayo***".

Farqada 3aad ee Qodobka, oo dhignayd:

Gudoomiyaha goobtu markuu dhameeyo tirinta, wuxuu hubinayaa tirada waraaqaha cod-bixinta, iyo inay is keenayaan tirada codadka ururada/axsaabtu guud ahaan heleen, wuxuu intaas raacinayaa tirada codadka lagu muransan yahay ama aan hagaagsanayn ama aanay waxba ka jirin ee ku xusan qodobka 57aad ee Xeerkan.

Waa la beddelay, waxaana loo beddelay sidan soo socota:

Guddoomiyaha goobtu markuu dhameeyo tirinta, wuxuu hubinayaa tirada guud ee waraaqaha cod-bixinta, iyo inay isle'ekaadaan tirada codadka ururada/axsaabtu guud ahaan heleen, tirada codadka lagu muransan yahay, aan hagaagsanayn, aanay waxba ka jirin, iyo kuwa aan la isticmaalin ee ku xusan Qodobka 58aad ee Xeerkan.

Qodobkaasi farqadiisa 5aad, weedha u danbaysa ee ah "kadib waa la daadinayaa" waa la tirtiray waxaana lagu beddelay "***<u>waxa lagu ridayaa burshad gaar ah</u>***"



<u>Qodobkii 52aad oo iminka noqdey Qodobkii 53aad</u>

Qodobka 52aad, oo hadda ah Qodobka 53aad, farqada 1aad, ereyga ahayd "qodobada hore" waxa lagu beddelay qodobada 51aad, iyo 52aad, erayga "codadka saxda noqday" waxa lagu beddelay "wadarta codadka ansaxay" waxana laga saaray kalmada "liis" waxaanu qodobkaasi noqonayaa sidan:

1. Markuu guddoomiyaha goobtu dhameeyo hawsha tirinta ee ku xusan Qodobada 51aad, 52aad, wuxuu iyadoo fagaare ah ku dhawaaqayaa wadarta tirada cod-bixiyayaasha, wadarta codadka ansaxay iyo tirada codadka uu helay, murashax kasta oo xisbi/urur.

Qodobkaasi farqadiisa 2aad, ereyga "buqshada" waxa lagu beddelay "Xaashida Natiijada Codbixinta" (Result Sheet). Halka farqadaasi u danbaysa ee "sanduuqa" waxa lagu beddelay "buqshadda 6aad", waxanu farqadaasi u dhigmaysaa sidan:

Si looga badbaado luminta codadka ay muwaadiniintu dhiibteen, waxa wakiilka xisbi/urur ku waajib ah in uu saxeexo **Xaashida Natiijada Goobta-codbixinta (result sheet)** ama uu qoraal kusoo gudbiyo sababaha uu u saxeexi waayay, iyo cabashooyinka kale ee xisbiyada/ururada laguna rido **buqshadda 6aad**.

Qodobkasi waxa lagu daray farqad 6aad oo u dhigan sidan:

6. Komishanka Doorashooyinka Qaranku waxa ay soo saari doonaan habraac dhamays tiran oo khuseeya habka xidhitaanka iyo tirinta codadka.

Qodobkii 54aad oo iminka noqdey Qodobkii 55aad

Qodobka 54aad, oo imika ah Qodobka 55aad, farqadiisa 1aad oo u dhignayd:
Natiijada raadraaca ee goobta cod-bixinta waxa lagu qorayaa foomka uu soo diyaariyey Komishanka Doorashooyinka Qaranku ee ka kooban xaashi asal (original ah) iyo kow iyo toban xaashoyood xaashiyood oo nuqullo ah (copies), iyada oo fagaare ahna waxa Gudoomiyaha Goobtu ku dhawaaqayaa: Wax baa laga beddelay, waxana uu noqonayaa sidan:

1. **Natiijada raadraaca ee goobta cod-bixinta waxa lagu qorayaa foomka uu soo diyaariyey Komishanka Doorashooyinka Qaranku ee ka *kooban xaashi asal (original ah) iyo nuqulada lagama maarmaanka ah (copies),* iyada oo fagaare ahna waxa guddoomiyaha goobtu ku dhawaaqayaa:**

Isla qodobkaasi farqadiisa 2aad oo u dhignayd:

Xaashida asalka ah ee foomka ku xusan farqadda 1aad ee Qodobkan waxa loo gudbinayaa Gudoomiyaha Xafiiska Doorashada ee Gobolka, laba nuqulna waxa lagu ridayaa isla sanduuqa ay ku jiraan baqshadaha lingaxan ee ku xusan Qodobka 55aad (1 iyo 2) ee Xeerka iyo wixii ka hadhay agabkii doorashada waxaana loo gudbinayaa Xafiiska Doorashada ee Degmadda, sagaalka nuqul ee soo hadhayna waxa la kala siinayaa wakiillada. Waa la beddelay, waana lakala qaybiyaya, Waxana loo beddelay sidan soo socota:

2. Xaashida asalka ah ee ***Natiijada goobta*** ku xusan Farqadda 1aad ee Qodobkan waxa lagu ridayaa ***Buqshada 7aadwaxaana gacantaloogu gudbinayaa Guddoomiyaha Xafiiska Doorashada ee Degmadda.***

3. Laba nuqulna waxa lagu ridayaa buqshada 8aad, oo lagu ridayo isla sanduuqa ay ku jiraan buqshadaha lingaxan ee ku xusan Qodobka 56aad (1 iyo 2) ee Xeerkan

iyo wixii ka hadhay agabkii doorashada waxaana loo gudbinayaa Xafiiska Doorashada ee Degmadda, ***wakiilada xisbiyadana/ururada waa in la siiyaa min hal nuqul.***



Qodobkii 55aad oo iminka noqdey Qodobkii 56aad

Qodobka 55aad oo hadda ah Qodobka 56aad, farqadiisa 2aad, ereyga ah "***baqshadaha***" waxa lagu beddelay "***Sanduuqa ay ku jiraan baqshadaha***" waxanu qodobkaasi u dhigmayaa sidan:

2) Marka xafiiska doorashada ee degmada lagu wareejinayo ***sanduuqa ay ku jiraan*** buqshadaha waa in la hubiyo inay lingaxan yihiin oo aan la furin lana farafarayn. Guddoomiyaha doorashada ee degmadu waa inuu bixiyo caddaynta la wareegidda agabkaas.

QAYBTA 10AAD oo loogu magac daray "***Hawlaha Xafiisyada Sare ee Doorashada*****".**

Qodobkii 56aad oo iminka noqdey Qodobkii 57aad

Qodobka 56aad oo hada ah, Qodobka 57aad, farqadiisa (C), ereyga ah "**saxaradaha**" waxa lagu beddelay "***sanduuqa***".

Farqadiisa 2aad qodobada ay tixraacayso ee 50aad, 51aad, 54aad, way is-beddelaysaa waxaanay noqonaysaa 51aad, 52aad, 53aad, 55aad.

Qodobkii 60aad oo iminka noqdey Qodobkii 59aad

Qodobka 60aad, ee Xeerka oo hadda ah Qodobka 59aad ee ka hadlaya gudbinta raad- raaca, farqadiisa koowaad oo u dhignayd sidan:

Raadraacyada hawlgalada ku xusan qodobada 55aad, 56aad iyo 58aad ee xeerkan waxa lagu qorayaa

foomamka Komishanku u diyaariyey mid kasta, waana inay ahaadaan min saddex nuqul.

Wax baa laga beddelay, waxana uu noqonayaa sidan:

1. **Raadraacyada hawlgalada ku xusan qodobada 56aad, 57aad ee Xeerkan waxa lagu qorayaa foomamka Komishanku u diyaariyey mid kasta, waana inay ka koobnaadaan *nuqulada lagama maarmaanka ah ee Komishanku go'aamiyo*.**

Qodobkii 58aad oo iminka noqdey Qodobkii 62aad

Qodobka 58aad, oo hadda ah Qodobka 62aad, farqadiisa 4aad, xubnihiisa (A) halka ah "iyo shan xaashiyood oo nuqulo ah" waxa lagu beddelay "iyo nuqulada lagama maarmaanka ah"
Xubintiisa (B) oo u dhignayd sidan:

Xaashida asalka ah, oo uu ku lifaaqan yahay nuqul ka mid ah natiijada doorashada ee degmo kasta oo gobolka ah, waxa uu u dirayaa Maxkamadda Sare.

Waxa lagu sameeyay wax-ka-bedelk waxaanay u dhigmaysaa sidan:
B) ***Nuqulada foomamka natiijada gobolka,*** oo ay ku lifaaqan yihiin xaashiyihii asalka ahaa ee natiijooyinka doorashada ee degmooyinka gobolka, waxa uu u dirayaa Komishanka Doorashooyinka Qaranka;

Farqadiisa (C) oo u dhignayd sidan:

Sagaalka nuqul ee soo hadhayna wuxuu kala siinayaa wakiillada saddexda xisbi ee Xafiiska Doorashada Gobolka.

Waxa lagu sameeyay wax-ka-bedel, waxaanay noqonaysaa sidan:

C)Wakiiladda Axsaabta/ururada ee Xafiiska Doorashada Gobolkana waa in uu siiyaa min hal nuqul.



Qodobka 64aad

Qodobka 64aad, bilawgiisa halka ah "**Gudoomiyaha Komishanku**" wax baa laga beddelay waxana lagu beddelay **"*Xarrunta Dhexe ee Komishanku*"**

Qodobkii 65aad oo iminka noqdey Qodobkii 66aad

Qodobka 65aad oo hadda ah Qodobka 66aad, halka ah "20 maalmood gudahood" waxa lagu beddelay "7 maalmood gudahood", waxana lagu soo kordhiyay farqad cusub oo u dhigan sidan:

2. Maxkamadda Sare waa in ay dacwadaha doorashada madaxtooyada kaga go'aan gaadhaan muddo 10 casho gudahood ah.

Farqada 3aad ee isla qodobkaasi ereyga ah ***"waxa ay ku dhawaaqaysaa"*** waxa lagu beddelay "***waxa ay asnixinaysaa".***

QAYBTA 12AAD KU XADGUDUBYADA

Xeerka waxa guud ahaan lagu kordhiyay Qayta 12aad oo ciwaankeedu yahay (Xadgudubyada) qodobka 67aad kana kooban 7 farqadood. Waxaanu noqday sidan:-

Qodobka 67aad

Ciqaabta Xadgudubka

1. **Qof kasta oo la yimaada goob-codbixineedkaadh codbixneed oo aanu lahayn, isaga oo ujeedadiisu tahay in uu ku codeeyo, ama waraaqo codbixineed oo**

dheeraad ah, waxa uu galay danbi waxaana uu mutaysanayaa ciqaab dhan hal sanno ilaa laba sanno oo xadhig ah, ama ganaax lacageed oo dhan 2,000,000/= ilaa 3,000,000/= (laba ilaa saddex milyan oo shilin Somaliland ah).

2. **Qof kasta oo keydsada kaadhadh codbixineed oo cid kale leedahay isaga oo ujeedadiisu tahay in tahay in uu maalinta codbixinta si qaldan uga faa'iideysto waxa uu galay danbi waxana uu mutaysanayaa ciqaab dhan lix bilood ilaa laba sanadood oo xadhig ah iyo/ama ganaax lacageed ah oo dhan 500,000/= ilaa 2,000,000 oo Shilin Somaliland ah.**

3. **Qof kasta oo sameeya, qaybiya, qaata, ama sifo kalaba u adeegsada kaadh codbixineed oo been abuura ama waraaqo codbixneed oo been abuur ah, waxa uu galay danbi waxanu mutaysanayaa ciqaab dhan saddex sanno ilaa lix sanno oo xadhig ah, iyo ganaax lacageed oo dhan 5,000,000 ilaa 10, 000, 000 (Shan milyan ilaa toban milyan oo Shilin Somaliland ah).**

4. **Waxa reeban in goobta cod-bixinta laga ololeeyo, cod-bixiyayaasha laga hor istaago ama loo diido in ay codeeyaan, la hadido, la laaluusho ama khalkhal gelin lagu sameeyo nidaamka goobta codbixinta. Qof kasta oo falalkaasi ku kacaa waxa uu galay danbi, waxanu mutaystay ciqaab dhan lix bilood ilaa saddex sano iyo/ama ganaax lacageed oo dhan 1 milyan ilaa 3 milyan oo Somaliland Shiling ah.**

5. **Qof kasta oo xoog u adeegsada ama ugu hanjaba inuu xoog u adeegsanayo, hawlwadeenada goobta codbixinta, si ugu qasbo in ay wax-is-daba marin sameeyaan, ama joojiyaan hawsha goobta codbixinta, waxa uu galay danbi, waxana uu mutaysanayaa ciqaab dhan lix bilood ilaa 5 sano oo xadhig ah, iyo/ama ganaax dhan 1,000,000/= ilaa 5,000,000/= oo Shilin.**

6. **Hawlwadeenkasta oo fududeeya in la musuqmaasuqo natiijada goobaha codbixinta, ama wax-is-daba marin ku kaca, waxa uu galay danbi, waxana uu mutaysanayaa ciqaab dhan 3 sanno ilaa 5 sanno oo xadhig ah iyo ganaax lacageed oo dhan 1,000,000/= ilaa 5,000,000/= oo Somaliland Shilin ah.**

7. **Hawlwadeen kasta oo si ula kac ah u burburiya, qariya, ama baabiiya waraaqaha codbixinta, najiitada codbixinta, ama qalabka goobta codbixinta waxa uu galay danbi waxana uu mutaysanayaa ciqaab dhan hal sanno ilaa laba sanno oo xadhig ah, ama/iyo ganaax lacageed oo dhan 1,000,0000/= ilaa 3,000,000/= oo Shilin.**

Xeerka waxa kale oo lagu daray Qodobka 68aad:

Qodobka 68aad

Xeer-nidaamiye

Komishanka Doorashooyinku waxa uu awood u leeyahay in uu soo saaro xeer-nidaamiye, xeerar anshax, habraacyo, hagaha tababarka (training manuals), wacyigalino hannanka doorashooyinka oo lagu hirgalinayo, laguna faafaahinayo Xeerkani iyo doorashooyinka , kuwaas oon ka hor imaanayn Xeerkan.

QODOBKA 69aad

Laalid

Waxa halkan lagu tirtiray qodob kasta oo kasoo horjeeda Qodobada wax-ka-bedelkani, oo kusoo baxay Xeerka Doorashooyinka Madaxtooyada iyo Golyaasha Deegaanada ee Xeer Lr. 20/2001 iyo wax

ka beddaladiisa/kaabistiisaiyo lifaaqyadiisa 1aad, 2aad, 3aad, 4aad, iyo 5aad.

Qodobka 70aad

Dhaqangal

Xeerkani (Isku-dhafka iyo Wax ka Beddelka ah) waxa uu dhaqangelayaa marka ay ansixiyaan goleyaasha sharci dejintu. Madaxweynuhu uu saxeexo, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee JSL.

C/risaaq Siciid Ayaanle
Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL

Baashe Maxamed Faarax
Guddoomiye ku xigeenka 1aad
ahna Ku-simaha Guddoomiiyaha
G/Wakiilada JSL

REPUBLIC OF SOMALILAND

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-4469/012017 DATE....04/01/17

XEER MADAXWEYNE Lr: 0755/012017

Dhaqan-galka Miisaaniyad Sannadeedka 2017-ka

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Go'aanka Golaha Wakiilada, Go'aan Lr. GW/G/KF-32/710/2017 ee ku taariikhaysan 03/01/2017 ee ay ku ansixiyeen Miisaaniyadda Sannadka 2017-ka ee Dawlada Dhexe, Dawladaha Hoose, Baanka Dhexe, Dekeda Berbera, Wakaalada Biyaha, Wakaalada Laydhka Berbera, Madbacada Qaranka, Wasaaradda Duulista iyo Hawada, Dakhliga Deeqaha Caalamiga ah iyo Dakhliga Mashruuca Maamul Daadejinta;

Wuxuu Soo Saaray

Xeerkan oo lagu baahinayo dhaqan-galka Miisaaniyad Sanadeedka 2017-ka ee Dawladaha Dhexe, Dawladaha Hoose, Baanka Dhexe, Dekeda Berbera, Wakaaladaha Biyaha, Wakaaladda Laydhka Berbera, Madbacadda Qaranka, Wasaaradda Duulista iyo Hawada, Dakhliga Deeqaha Caalamiga ah iyo Dakhliga Mashruuca Maamul Daadejinta.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

The Republic of Somaliland
House of Representatives
Head Quarter Hargeisa.

Jamhuuriyadda Somaliland
Golaha wakiilada
Xarunta Hargeisa

Ref: GW/KF-32/710/2017 Date: 03/01/2017

GO'AANKA ANSIXINTA MIISAANIYADDA DAWLADDA EE 2017ka

MARKUU ARKAY:	Qodobada **54aad** iyo **55aad** ee Dastuurka Qaranka.
MARKUU DHEGAYSTAY:	Xog-waranka **Wasiirka Wasaaradda Maaliyaddu** Ku ifiimiyay odoroska miisaaniyadda Dawladda ee **2017ka**
MARKUU DHEGAYSTAY:	Xog warankii soo jeedinta iyo talooyinkii Guddi **Hoosaadka Dhaqaalaha** ee Golaha Wakiiladda.
MARKUU KA DOODAY:	Qaybaha kala duwan ee Miisaaniyadu ka kooban tahay.
MARKUU U CODEEYAY:	Ansixinta odoroska **Miisaaniyada Dawladda** ee sanadka **2017ka** kal- Fadhigii **32aad** fadhigisi **18**[aad] ee **2/1/2017** oo ay goob joog ahaayeen **67 Mudane** oo ka mid ah mudanayaasha Golaha Wakiiladda.

WUXUU COD AQLABIYAD AH (43COD) OO GACANTAAG AH KU ANSIXIYAY

1. Odoroska miisaaniyada oo ka kooban sidan qadarkeeduna dhanyahay **2,175,104,355, 662** (laba tiriliyan, boqol iyo shan todobatan bilyan, boqol iyo afar milyan, saddex boqol iyo shankonton kun,lix boqol iyo labiyo lixdan shilin) oo u dhiganta **362,517,393** (saddex boqol laba iyo lixdan milyan, shan boqol iyo todobiyo toban kun , saddex boqol iyo saddex iyo sagaashan dollar)

Faahfaahinta Dakhliga Miisaaniyada 2017

No.	Magaca	Budget 2017
1.	Dawladda Dhexe	1,553,204,022,280
2.	Dawladdaha Hoose	208,570,347,257
3.	Dekadda Berbera	200,891,841,500
4.	Baanka Dhexe	29,965,644,952
5.	Wakaalada Biyaha Gebiley	2,122,323,000
6.	Wakaalada Biyaha Hargaysa	25,719,277,055
7.	Wakaalada Biyaha Burco	11,218,141,645
8.	Madbacada Qaranka	4,747,807,513
9.	Wasaaradda Duulista	3,085,200,000
10.	Wakaalada Biyaha Berbera	6,325,324,600
11.	Wakaalada laydhka Berbera	12,373,771,860
12.	Wakaalada Biyaha Boorama	6,889,200,000
13.	Dakhliga Deeqaha Caalamiga ah	97,268,562,000
14.	Dakhliga Mashruuca Maamul Daadejinta	12,722,892,000
	Grand Total	**2,175,104,355,662**

Ansixinta Miisaaniyada waxaa **dilday 17 (todoba iyo toban Mudane)**, halka lix (6) mudane ka aamuseen, Gudoomiyuhuna muu codayn sida caadada ah.

Miisaaniyadani waxay dhaqan gelaysaa marka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland soo saaro Digreetada dhaqangelinta.

ALLAA MAHAD LEH

C/risaaq Siciid Ayaanle
Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL

Baashe Maxamed Faarax
Guddoomiyah Golaha Wakiilada JSL

QAYBTA LABAAD:

XEER MADAXWEYNE:

REPUBLIC OF SOMALILAND

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-4495/012017 DATE....18/01/17

XEER MADAXWEYNE Lr: 0756/012017

Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay:	Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
Markuu Arkay:	Qodobka 110aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
Markuu Tixgeliyay:	Ahmiyadda ay Guddoomiyayaasha Gobolladu u leeyihiin dhismaha Qaranka;
Markuu Aqoonsaday:	In baahi loo qabo buuxinta jagada Guddoomiyaha

Gobolka Maroodijeex ee Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu ka Fiirsaday: Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo;

Markuu Ku qancay: In uu hanan karo xilkan loo magacaabay;

Wuxuu Go'aansaday

In Mudane, Cabdillaahi Jibriil Gaaxnuug (Buraale) laga bilaabo taariikhda manta oo ahaado Guddoomiyaha Gobolaka Maroodijeex ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF SOMALILAND

THE PRESIDENT

JSL/M/WM/222-4481/012017 DATE....15/01/17

Ku: Wasiirka Wasaaradda Cadaalada Hargeysa

Ku: Gudoomiyaha Maxkamadda Sare ee JSL ahna Guddoomiyaha Gudiga Cadaalada Hargeysa

Ku: Wasiirka Wasaaradda Maaliyada Hargeysa

Og: Guddoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha Dawlada Hargeysa

Og: Xubanaha Guddiga Cadaaladda

Hargeysa

Og: Wasiirka Wasaaradda Madaxtooyada

Hargeysa

Ujeeddo: <u>Wareegto Madaxweyne Wareejinta Maamulka iyo Miisaaniyadda Maxkamadaha Hoose</u>

Mudanayaal iyo Marwo,

Markaan Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland;

Markaan Arkay: Qodobada 37aad, 97aad, 99aad, 107aad iyo 108aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland iyo Xeerka Nidaamka Garsooorka Xeer Lr. 24/2003;

Markaan Arkay: Qodobka 97aad, faqradiisa 2aad ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland, kaasi oo dhigaya in Waaxda Garsoorku ay hawlaheeda u fuliso si waafaqsan Dastuurka, iyada oo ka madax-banaan Waaxaha kale ee Qaranka;

Markaan Arkay: Qoraalka Sumadiisu tahay MS/GMS/G-7/69/2016 ee ku taariikhaysan 27/01/2016, ujeedadiisuna ahayd codsi kasoo wareejin Wasaaradda Caadaalada Maamulka iyo Miisaaniyadda Maxkamadaha Hoose, qoraalkaas oo kasoo baxay Xafiiska Guddiga Cadaalada 27/01/2016;

Markaan Arkay: Qoraalka Guddoomiyaha Maxkamada Sare ee JSL ee sumadiisu tahay MS/GMJ/G-18/272016 ee ku taariikhaysan 21/02/2016, ujeedadiisuna ahayd in lagu soo wareejiyo Maxkamada Sare ee JSL Maamulka iyo Miisaaniyada Maxkamadaha Hoose;

Markaan Ogaaday: In Wasaarada Cadaaladu ay Miisaaniyadda Maxkamadaha Hoose ku maamulaysay Degreeto Madaxweyne Lr. 47/1996 kaas oo ka horreeyay Dhaqan-galkii Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland;

Markaan Arkay: Qoraalka Garyaqaanka Guud ee Qaranka ee sumadiisu tahay TIX/XGGQ/X/H/138/2016, kuna taariikhaysan 20/12/2016, ujeedadiisuna ahayd Talo-bixin Sharci ee Maamulka Maaliyada Maxkamadaha Hoose ee Dalka;

Markaan Tix-galiyay: Qoraalka kasoo baxay dhamaan Guddoomiyayaasha Maxkamadaha Racfaanada Gobolada Dalka, kuwaas oo ku cadeeyay qoraalkaas tabasho ay ka qabaan Maamulka iyo Miisaaniyadda Maxkamadaha Hoose ee Wasaaradda Cadaaladu gacanta ku hayso;

<u>Waxaan Soo saaray;</u>

1. In laga bilaabo Sannad Miisaaniyadeedka 2017-ka waxaa Wasaaradda Cadaalada laga soo wareejiyay Maamulka iyo Miiisaaniyadda Maxkamadaha Hoose ee Dalka.

2. In lagu wareejiyo Maxkamada Sare ee JSL Maamulka iyo Miisaaniyadda Maxkamdaha Hoose ee Dalka, si loo kala Madax banaaneeyo Waaxaha Qaranka, sida ay dhigayaan Qodobka 37aad, faqradiisa 2aad iyo Qodobka 97aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.
3. In kaaliyayaasha, Gaadhsiiyayaasha iyo Adeegayaasha ka hawl gala Maxkamadaha Hoose ee Dalka, la hoos geeyo Maxkamada Sare, nidaamka shaqaalayntoodana iyada oo loo raacayo Qodobka 108aad, faqradiisa 1aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland iyo Xeerka Nidaamka Garsoorka ee Xeer Lr. 24/2003.
4. In Magaca Wasaaraduna uu noqdo **"Wasaarada Cadaalada JSL",** sida uu dhigayo Qodobka 106aad ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland.

Haddaba, waxaan farayaa Wasiirka Wasaarada Cadaalada in uu si dhameystiran ugu wareejiyo Maxkamada Sare Maamulka Shaqaalaha iyo Miisaaniyadda Maxkamadaha Hoose ee Dalka.

Sidoo kale, waxaan farayaa Wasiirka Wasaarada Maaliyada iyo Hay'adaha kale ee ay khusayso in ay dhaqan geliyaan Wareegtadan, isla markaana ay ku gutaan waajibaadkooda dastuuriga ah.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF SOMALILAND

THE PRESIDENT

Ku: Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda
Hargeysa
Ku: Wasiirka Wasaaradda Arimaha Gudaha
Hargeysa
Ku: Wasiirka Wasaaradda Madaxtooyada
Hargeysa
Ku: Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga
Hargeysa
Ku: Xeer Ilaaliyaha Guud
Hargeysa
Ku: Gudoomiyaha Baanka Dhexe ee JSL
Hargeysa
Ku: Xisaabiyaha Guud ee Qaranka
Hargeysa
Og: Dhammaan Guddoomiyayaasha Gobollada iyo
Degmooyinka Dalka
Fadhiyadooda
Og: Dhammaan Agaasimayaasha Guud ee
Dawladda
Hargaysa
Og: Dhammaan Taliyayaasha Ciidamada Qaranka

Fadhiyadooda

Og: Guddoomiyayaasha Hay,adaha Dawladda Hargaysa

Og: Guddomiyaha Maxkamadda Sare Hargaysa

Og: Shir-guddoonka Golaha Wakiiladda JSL Hargaysa

Og: Shir-guddoonka Golaha Guurtida JSL Hargaysa

Og: Madaxweyne ku -xigeenka JSL Hargaysa

Ujeeddo: <u>Qorshaha Deg-dega ah ee Joojinta Sicir-bararka</u>

Mudanayaal,

Tix-raac Go'aanka Golaha Wasiirada ee tirsigiisu yahay Lr. **212**aad kuna Taariikhaysan 24/01/2017, kaasoo lagaga dooday laguna falanqeeyey daraasaad qotodheer oo ay soo bandhigeen Guddidii aan u xilsaaray qiimo dhaca shilinka Somaaliland. Gebagebadii Kalfadhigaa aan caadiga ahayn waxay dhammaan xubnaha Golaha Wasiirradu ku ansixiyeen kuna taageereen in la qaado tallaabooyinkan deg-dega ah ee lagaga hor tagayo sicir-bararka iyo qiima dhaca Shilinka Somaliland.

Haddaba, waxaan halkan idiinku soo gudbinayaa qodobadii ay Golaha Wasiirradu ansixiyeen, kuwaas oo ah qorshaha deg-dega ah ee joojinta sicir-bararka, waana sidan:

1. Adkaynta iyo xoojinta xidhiidhka wada shaqayneed ee hay'adaha ay sida tooska ah arrintani u khusayso oo kala ah:
    - Baanka Dhexe ee JSL
    - Wasaaradda Maaliyadda
    - Wasaaradda Ganacsiga
2. In la joojiyo kharashaadka dawladda (**Government Expenditure**) ee lagu bixiyo lacagta adag ee Doolar-ka ah, marka laga reebo Raashinka Ciidammada, Wakiillada Dibedda ee JSL, Safarrada Dibedda ee Madaxda Dawladda iyo kharashka hawada sare ee TV-ga Qaranka.

3. In Wasaaradda Maaliyaddu iyo Baanka Dhexe ay abuuraan guddi laba geesood ah oo ka kooban afar xubnood oo kala ah:
    - Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda
    - Guddoomiyaha Baanka Dhexe ee JSL
    - Agaasimaha Guud ee Baanka Dhexe ee JSL
    - Xisaabiyaha Guud ee Qaranka

Guddidaasi waxay si wada jir ah u xaraashi doonaan lacagaha US Dollar-ka ah iyo Shillinka Somaliland, si ay isugu dheeli-tiraan baahida Dollar-ka iyo Shillinka Somaliland, una suurta-geliyaan heer ay is leekaadaan labada baahiyood ee Shillinka iyo Dollar-ka **(Demand and Supply Equilibrium)**.

4. In la joojiyo kharashaadka Dawladda ee ku baxaya Shillinka Somaliland muddada lala dagaalamayo sicir-bararka iyo qiima dhaca Shillinka Somaliland, marka laga reebo Mushaharka Shaqaalaha, Ciidammada, kharashka hawl socodsiinta iyo gurmadka abaaraha.
5. In shirkadaha waaweyn ee leh bangiyada gaarka ah **(Private Banks)** sida Dahabshiil Group iyo

Telesom Group, ay si rasmi ah u joojiyaan isku beddelka lacagaha qalaad **(Foreign Money Exchange**), sidoo kale ganacsatada waaweyn ee wax dhoofisa waxna soo dejisa sida Shirkadda Oomaar, Shirkadda Deero iyo IWM, aanay iyaguna si toos ah iyo si dadban toona uga ganacsan karin isku beddelka lacagaha.

6. In Shirkadaha Telesom iyo Dahabshiil ee leh adeegga Zaad iyo E-Dahab, ay joojiyaan lacagta Dollar-ka ee lagu shubayo telefoonnada gacanta wixii ka yar **$100** (Two Digits), kana saaran nidaamkooda Dollar-ka.
7. Si kor loogu qaado isticmaalka Shillinka Somaliland, waa in Shirkadaha Telesom iyo Dahabshiil adeegyadooda Zaad yo E-Dahab ay ka dhigaan ku shubashada iyo ku kaydsiga lacageed mid aan xad lahayn oo Shillinka Somaliland.
8. Maadaama lacagta sharciga ah ee Dalkani leeyahay **(Legal Tender)** ay tahay Shillinka Somaliland, sida uu dhigayo Xeerka **32aad** ee Baanka Dhexe ee JSL, waa in ganacsatada bixisa adeegyada kala duwan (**Service Providers)** iyo kuwa ka ganacsada alaabta **(Purchasing Goods)** ay ku saleeyaan iibkooda Shillinka Somaliland, gaar ahaan bixinta kharashyada loo isiticmaalo bishii, sida ajuurada waxbarashada (**School Fees**), bixinta nalka, biyaha, kirada guryaha, ku shubashada telefoonnada gacanta iyo IWM.
9. In bangiyada gaarka loo leeyahay **(Private Banks)** ay macaamiishooda u furaan Xisaab Shillinka Somaliland, maadaama ay tahay lacagta sharciga ah ee dalku leeyahay.
10. Waa in la xoojiyaa awoodda Baanka Dhexe ee JSL ee uu siinayo Xeerka Baanka Cutubkiisa **2aad** Qodobkiisa **4aad.**

11. Waa in mustaqbalka fog Baanka Dhexe ee JSL loo abuura rasamaal ballaadhan.

12. Waa in la hakiyo Saddex Biloodka ugu horreeya ee soo socda hawlgelinta shaqaalaha iyo ciidammada cusub ee ku jira Miisaaniyadda sannadka 2017-ka.

13. Isticmaal la'aanta lacagta qaranku waa dembi. Sidaa darteed, waa waajib Qaran in dhammaan muwaadiniinta iyo shisheeyaha ku nool Jamhuuriyadda Somaliland, ay si rasmi ah u adeegsadaan, waxna ku iibinayaan waxna ku iibsadaan cumladda dalka. Cid kasta oo ka hortimaadda dhaqangalkeeda iyo isticmaalkeeda, waxaa laga qaadayaa tallaabo adag oo sharciga waafaqsan.

14. Waxaa reebban in shaqaale weynaha dawladda, ciidammada iyo madaxda kala duwan ee qaranku ay ku beddelaan mushaharkooda lacagta Dollar-ka. Sidoo kale, waxaa reebban in sarriflyaashu wax ku beddelaan ama lacagaha qalaad ku sarrifaan Baanka Dhexe iyo Laamaha Gobollada, ama agagaarkooda.

15. Waxaa la mamnuucay in aanu sarrifka Dollar-ku dhaafi karin **SL.SH/= 7,000 (Toddoba Kun oo Somaliland Shillings)**.

16. In la dhiso kalsoonida Baanka Dhexe ee shacbiga iyo ganacsatada, si taa loo meelmariyo, waa in dib u habayn lagu sameeyo Guddida Agaasinka Baanka Dhexe ee JSL **(Board of Directors)**.

17. In la hubiyo nidaamka iyo qaabka ay wax u sarrfitaan Wakiillada iyo ganacsatada ka xoogsada Jaadka.

Haddaba, maadaama loo baahan yahay in si deg-dega loo hirgeliyo qorshahan, waxaan hirgelinta iyo

dabagalka hawshan u magaacabay masuuliyiintan soo socda:

1. Guddoomiyaha Baanka Dhexe ee JSL.
2. Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda.
3. Wasiirka Wasaaradda Madaxtooyada.
4. Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha.
5. Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga iyo Maalgashiga Caalamiga ah.
6. Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka.

Ugu dambayn, waxaan farayaa dhammaan masuuliinta ay warqaddani sida tooska ah iyo sida dadbanba ugu socoto, in ay meelmariyaan, fuliyaanna go'aamadan ka soo baxay Golaha Wasiirrada JSL, isla markaana ay sharciga la tiigsadaan cid kasta oo ka hor-timaadda dhagan-galkooda.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

QAYBTA SHANAAD:

AMARADA, OGEYSIISYADA &

QANDARAASYADA DOWLADA:

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/12/2017. 15/01/2017

Ku: Cidda Ay Khuseyso. Hargaysa

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha. **(partnership**)

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaangeliso Shirikadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda magaceedu yahay, DURDUR ENERGY COMPONY., oo ay ku cadyihiin xubnaha shirkadu sida ku cad qodobka 11aad(2)(a) somaliland company law.

Markuu Arkay:- In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay: - Saxeexa saamiilaha Shirkaddu ay saxeexay sida uu qabo qodobka

11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliye.y

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaangashantahay shirkada magaceedu yahay **DURDUR ENERGY COMPONY, Astaanteeduna tahay: -** (magaca Shirkada iyo Xadhkaha Laydhka), shaqadeeduna tahay Bixinta Adeegyadda tamarta iyo laydhka (Energy and Electrict Power) xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 15/01/2017

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.

JAMHUURIYADDA SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/13/2017. 15/01/2017

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha. (**Partnership**).

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaangeliso Shirikadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda magaceedu yahay, DhAQAALOKAAB INVESTMENT. Oo ay ku cad yihiin xubnaha shirkaddu, sida ku cad qodobka 11aad(2)(a) Somaliland Compony Law.

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland.

Markuu arkay: - Saxeexa saamiilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliye.y

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaangashantahay shirkada magaceedu yahay **DHAQAALO KAAB INVESTMENT, Astaanteeduna tahay: -** (Magaca shirkada), shaqadeeduna tahay Kalluumaysiga (fishing) xarunteeduna tahay Magaaladda Hargaysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 15/01/2017.

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.

JAMHUURIYADDA SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/14/2017. 16/01/2017

Ku: Cidda Ay Khuseyso. Hargeysa.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha. (**Partnership**)

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaangeliso Shirikadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda magaceedu yahay, AMAAN PLC, oo ay ku cad yihiin xubnaha shirkadu, sida ku cad qodobka 11aad (2)(a) Somalinad Company law.

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004

Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay: - Saxeexa saamiilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliye. Y

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaangashantahay shirkada magaceedu yahayamaan **AMAAN PLC**, **Astaanteeduna tahay: -** (Magaca shirkada), shaqadeeduna tahay Soo dejinta Qalabka Electroonics-ka (Import), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 18/01/2017

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.

JAMHUURIYADDA SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/15/2017. 16/01/2017

Ku: Cidda Ay Khuseyso. Hargaysa

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha. (**Partnership**)



Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaangeliso Shirikadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda magaceedu yahay, ALLA-AAMIN PHARMACEUTICAL & AGRO-VET IMPORT COMPANY, oo ay ku cad yihiin xubnaha shirkadu, sida ku cad qodobka 11aad (2)(a) Somalind Company law.

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay: - Saxeexa saamiilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaangashantahay shirkada magaceedu yahay **ALLA-AAMIN PHARMACEUTICAL & AGRO-VET IMPORT**

COMPANY Astaanteeduna tahay: - (laba bilood oo iska soo horjeeda mid yar iyo mid wayn, ta wayni ay cas tahay ta yarina ay doog tahay), shaqadeeduna tahay soo Dejinta Dawooyinka (Import) xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 16/01/2017.

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.

JAMHUURIYADDA SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/16/2017. 22/01/2017

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha. (**Partnership**)

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaangeliso Shirikadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda magaceedu yahay, TACAB WADAAG MINING COMPANY, oo ay ku cad yihiin xubnaha shirkadu, sida ku cad qodobka 11aad (2)(a) Somaliland Company law.

Markuu Arkay:- In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay: - Saxeexa saamiilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliye.y

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaangashantahay shirkada magaceedu yahay, **TACAB WADAAG MINING COMPANY Astaanteeduna tahay: -** (Buur Magaca Shirkadu ku wareegsan yahay), shaqadeeduna tahay, Dhoofinta Macdanta (Mining Export), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargaysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 22/01/2017

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.

JAMHUURIYADDA SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/17/2017. 22/01/2017

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha. (**Sole Proprietorship**)

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaangeliso Shirikadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda magaceedu yahay, DAHAB OIL INDUSTERIAL.

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland,

Markuu arkay: - Saxeexa saamiilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka

11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliye.y

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaangashantahay shirkada magaceedu yahay **DAHAB OIL INDUSTERIAL**, **Astaanteeduna tahay: -** (Magaca shirkada), shaqadeeduna tahay Keenista Shidaalka (Fuel importion), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargaysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 22/01/2017

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.